



Lacagaha Kiridhidyadda Kiraystaha iyo Mulkiilaha Guri

(waxaa loogu yeeri jiray Lacagta u soo noqota Kiraystaha iyo Tan ka soo noqota Canshuurta Guriga)

Renter's Credit and Homeowner's Credit Refund - (was called Renter's Refund and Property Tax Refund)

Kiraystayaashu waxa ay xareysan jireen foom gooni ah si ay u helaan lacagta kiradda uga soo noqon jirtay. Hadda, waxa aad dalban kartaa taa iyadoo qayb ka ah canshuur-celintaadda Minnesota. Lacagta soo noqonaysaa hadda waa kiridhid canshuureed oo kale. Waxa ay yareysaa inta ay tahay canshuurta lagugu yeelanayo ama waxa ay kordhisaa lacagta kuu soo noqonaysa.

Waa maxay Lacagaha soo noqodka ee Kiridhidks Kiraystaha iyo Kiridhidka Mulkiilaha Guriga?

Qaar badan oo kiraystayaal iyo mulkiilayaal guryo ahi waxa ay ka heli karaan lacag kiridhid canshuureed ah Gobolka Minnesota sannad walba. Cadadka lacagta kiridhidka ee aad helaysaa waxa ay ku xiran tahay:

- inta ay tahay kiradda ama canshuurta guriga ee aad bixisay
- dakhligaaga iyo
- inta qof ee aad mas'uulka ka tahay

Ogow: Haddii aad leedahay guryaha la qaado aadna kiro ka bixiso dhulka gurigu yaal, isticmaal *Foomka M-1PR (Form M-1PR)* si aad u sheegato Kiridhidka Lacagta u soo noqota kiraystaha guriga la qaado. Siddoo kale, xareyso waxa la yiraa *Qorshaha (M1RENT)* si aad u sheegato Kiridhidka Lacagta Kiraystaha u soo noqota ee goobta guriga la dhigo ee kiradda ah. Raac talaabooyinka hoos lagu guud maray.



Ciddee heli karta Kiridhidka Lacagta Kiraystaha u soo noqota?

Waa aad heli kartaa haddii:

- aad guri kiraysato dakhligaaga qoyska oo dhan ee sannadka 2025 uu ka yaraa \$77,570 (dakhliga xaq ugu yeeladku kor buu sii aadaa mar walba oo dadka mas'uulka laga yahay ay sii kordhaan) **iyo**
- uusana kugu xareysan qof kale canshuur celinta dowladda dhexe 2025, **iyo**
- Sannadka 2025 oo dhan ama qaybtii aad degnayn Minnesota **aadna**

- Kiro ka bixisay dhisme la canshuuray

OGOW: haddii aad tahay kirayste, waa khasab inaad haysato sooshal sakuurati (social security) ansax ah ama lambarka aqoonsiga shakhsiga canshuur-bixiyaha (ITIN) oo ansax ah.

Siddee ayaan ku helaa kiridhidka Lacagta Kiraystaha?

- Laga bilaabo sannad-canshuureedka 2024, waxa aad u baahan tahay inaad buuxiso foomka *Qorshaha M1RENT (Schedule M1RENT)*. Waxa aad la buuxin doontaa kan canshuur-celintaada Dakhliga ee Minnesota si aad u hesho lacagta kiridhidka kiraystaha, Ka hor inta aadan buuxin kan, waa inaad buuxiso *Foom M-1PR* ah (*Form M-1PR*) oo gooni ah.

Haddii kumbuyuutarka aad ku xareynayso, foomkani waxa uu la socdaa akhbaarta canshuurta ee kumbuyuutarka ku jirta. Haddii aad boostadda ku soo dirayso, waxa aad u baahan tahay inaad ula soo baxdo (download) foomkan gooni aadna ku darto cashuur-celintaada caadiga ah. Waxa aad u baahan tahay sidoo kale inaad ku darto Warqadda Kiradda la Bixiyey [Certificate of Rent Paid (CRP)]. Qoladda guriga aad uga jirtaa waa inay ku siiso warqadda kiradda la bixiyey CRP ka hor bisha Janaayo 31, 2026.



- Maalinta ugu dambaysa ee canshuur-celinta 2025 la xareysan karaa waa bisha Abriil 15, 2026.
- Waa inaad ku hesho lacagta canshuurta kaaga soo noqonaysa 60-cisho gudahood ka dib kolka aad xareysato. Waxa aad ku heli kartaa lacagta kuu soo noqonaysa ilaa iyo 30-cisho ka sii hor waqtigaa haddii:
 - Aad kumbuyuutar ku xareysay
 - Aad dooratay midda toos ugu soo rididda lacagta akoonka ah. Taa macnaheedu waa lacagta waxaa lagu soo gelin akoonkaaga banigga.
 - Aad ku soo dartay dhamaan dukumiintiyadda loo baahan yahay. Taa waxaa ku jira warqada CRP.

Ka waran haddii qoladda gurigu aysan i siin warqadda CRP?

- Wac qoladda guriga kana codso mid. Haddii ay taasi shaqeyn waydo, warqad u qor qoladda guriga si aad mid u waydiisato. U sheeg cadadka kiradda ah ee aad bixisay sannadka. Ku dhehna, iyaga waxaa la idin ganaaxi karaa \$100 warqad walba oo CPR ah oo aydnaan bixin. Nuqul kala har warqada aad u dirto.

Haddii la ganaaxo lacagta ganaaxa waxay siin Waaxa Canshuuraha ee MN.

- Haddii qoladda gurigu aysan wali ku siin warqadda CPR, ka wac Waaxda Canshuuraha khadka ah (651) 296-3781. Waydii inay la xiriiraan qoladda guriga ayna ganaaxaan haddii qoladda gurigu aysan wali kuu soo dirin warqaddii adiga.
- Waaxda Canshuuraha waxa ay ku siin kartaa warqadda Dhaarta Kiradda la Bixiyey ah si aad u buuxiso intii aad sugi lahayd warqadda CRP. Waxa aad dalban kartaa tan ka dib bish.

Febraayo 1. Waxa aad u baahan tahay rasiidyadda ama cadeymo kale oo ah inta ay ahayd kiradda aad bixisay. Haddii aadan haysan rasiidyo, isticmaal warqadaha heshiiska (lease) guri degida, warqaddo guriga kuugu soo dhacay, ama wixii kale ee cadeynaya inaad halkaa ku noolayd, iyo cadadka kiradda ah ee aad bixisay intuu ahaa, ku murac in dowladdu ka soo qaado inaad kiradda la bixiyey.

Wali ma heli karaa kiridhidka lacagta Kiraystaha haddii aanan ku dalban canshuur-celintayda?

May. Waa khasab inaad ku sheegato canshuur-celintaadda gobolka Minnesota. Haddii aadan xareysan canshuur-celin ma aad helaysid lacagta kiridhidka ah. Maalinta ugu dambaysa ee canshuur-celinta 2025 la xareysan karaa waa bisha Abriil 15, 2026. Haddii aad xareysay canshuur-celinta Minnesota aadna hilmaamtay inaad sheegato kiridhidka lacagta kiraystaha, waa inaad xareysaa canshuur-celinta oo la saxay mar kale si aad u sheegato. Waxa aad tan sameyn adigoo xareysanaya *Foomka M1Xamended (Form M1Xamended)*, ee *Canshuurta Dakhilga ee la saxay ee Minnesota (Form M1XAmended Minnesota Income Tax)*.

Ciddee ayaa hesha Lacagta Kiridhidka ah ee u soo noqota Mulkiilaha Guri?

Waxa aad heli kartaa lacagta haddii:

- Aad adigu leedahay gurigaaga dakhligaaga guud ee 2025 uu ahaa \$142, 490 ((dakhliga xaq ugu yeeladku kor buu sii aadaa mar walba oo dadka mas'uulka laga yahay ay sii kordhaan) **iy**
- Uusan kugu xareysan qof kale canshuur celinta dowladda dhexe 2025 **iy**
- In sannadka 2025 oo dhan ama qaybtii aad degnayn Minnesota **iy**
- In adigu aad gurigaaga lahayd aadna ku noolayd gurigaa bisha Janaayo 2, 2026.

OGOW: Haddii aad tahay mulkiile gurigiisa asagu leh, waa KHASAB inaad lahaato lambar sooshal sakuurati (social security), si aad u hesho lacagta canshuurta guryaha la isugu soo celiyo.

Siddee ayaan ku helaa lacagta Kiridhidka ah ee u soo noqota Mulkiilaha Guri?

Haddii aad adigu guriga leedahay, isticmaal Oraahda Canshuurta Guriga si aad u dalbato lacagta kuu soo noqonaysa. Dalbo lacagta kuu soo noqonaysa ka hor bisha Agoosto, 2026.

- **Haddii aad ka xareysato lacagta canshuurta gurigaaga kaaga soo noqonaysa khadka (online)**, uma baahnid inaad hesho foom. Ugu soo dir akhbaartaadda Waaxda Canshuuraha shabakadda (website) ah: <https://www.mndor.state.mn.us/tp/OnlineServices/>. Meesha ay ku qoran tahay, 'Returns' hoosteeda, riix, 'Xareyso Canshuurta Celinta Guryaha ee Muliikayaasha Guryaha' '(File a Property Tax Return for Homeowners)'
- **Haddii aad ku soo xareyso canshuurta boostadda**, waxa aad u baahan tahay foom gooni ah oo la yiraa *Foomka 2025 M-1PR, (2025 Form M-1PR)*, ee *Lacagta Kiridhidka Canshuurta ee Guriga la Degan yahay (mulkiilayaasha guryaha)*.

Si aad foomamka emayl ahaan ugu soo dirto:

Gal khadka (online) ah: www.revenue.state.mn.us.

Wac: (651) 296-3781, ama

Warqad u soo dir: Minnesota Tax Forms

Mail Station 1421

600 N. Robert St.

St. Paul, MN 55146-1421



Buuxi *Foomka M-1PR (Form M-1PR)*, una soo dir ciwaanka:

Minnesota Property Tax Refund

Mail Station 0020

600 N. Robert St.

St. Paul, MN 55146-0020

Intee ayey Qaadataa inaan Helo Lacagta ii soo Noqonaysa?

Waa inaad ku hesho lacagta kuu soo noqonaysa 60-cisho gudahood laga bilaabo ka dib kolka aad xareysa ama ka dib bisha Sebtembar 30. Hadba kii dambeeya.

Waxa aad ku heli kartaa lacagta kuu soo noqonaysa ilaa iyo 30-cisho ka sii hor waqtigaa haddii:

- Aad kumbuyuutarka ku xareysay
- Aad dooratay midda toos ugu soo rididda lacagta akoonka ah. Taa macnaheedu waa lacagta waxaa lagu soo gelin akoonkaaga banigga.
- Aad ku soo dartay dhamaan dukumiintiydda loo baahan yahay

Waxa aan gafay waqtigii la soo xareyn lahaa warqadaha. Wali ma dalban karaa Kiridhidka Lacagta u soo noqonaysa Mulkiilaha Guri?

Mulkiilayaasha guryahu waxa ay xareysan karaan Foomka *M-1PR (Form M-1PR)*, ilaa sannad ka dib kolkii la rabay. Si aad u sheegato lacagta kuu noqonaysa ee 2025, waxa aad haysataa ilaa iyo bisha Agoosto 15, 2027, si aad u xareysato.

Xaggee ayaan ka heli karaa caawinaad ku saabsan foomamka canshuurta?

Haddii aad danyar tahay, ama aad nafo tahay ama aad tahay qof waayeel ah, waxa aad heli kartaa caawimaad bilaash ah. Si aad uga hesho caawimaad rug kuu dhow, ka wac:

- Waaxda Canshuuraha khadka ah (651) 297-3724 ama
- United Way ka wac 2-1-1 (gobolka oo dhan)

Xog Urursan oo ku saabsan macluumaadka sharciga MA AHA talo xagga sharciga. La tasho qareen. Ha isticmaalaan xogtan urursan haddi ay 1 sano ka soo wareegtay xilligii la daabacay. Weydiiso xogtii ugu dambaysay, liiska xogta urursan, ama aad ku hesho habab kale.

© 2026 Minnesota Legal Services Coalition. Qoraalkan waa la sii badin karaa waxaana loo adeegsan karaa oo kaliya hab shaqsi ah iyo waxbarasho kaliya. Xuquuqda kale waa mid la dhawray. Ogeysiiskan waa inuu la socdaa nuqul kasta oo la sii daabaco. Dib u daabicidda, sii qeybinta, iyo in loo isticmaalo hab ganacsi ah waa mid si adag loo mamnuucay.